

## Sidii dadka jilicsan ee Calgary looga caawin lahaa helitaanka kaalmooyinka

Luulyo 02, 2024 [Su'aalaha warbaahinta](#)

Dowladda Alberta waxay balaarinaysaa Xarunteeda Helitaanka iyo Kaalmooyinka ayada oo gaaarsiinaysa Calgary, ayada oo dadka jilicsan iyo kuw hoy la'aanta ah ku xiraysa kaalmooyinka iyo adeegyada.

Ayada oo la diyaariiyay kaddib markii lagu guulaystay Xarunta Helitaanka iyo Kaalmada ee Edmonton, xarunta cusub ee Calgary waxay dadka nugul ee reer Alberta ka taageeri doontaa ku xirista adeegyada lagama maarmaanka ah.

Xaruntu waxay bixinaysaa helitaanka adeegyada oo hal meel la isugu keenay sida taageerada dakhliga, hoyga iyo xiriirada guryaha, kaalmooyinka loogu tala galay dadka Asalka ah, aqoonsi Alberta oo sax ah, iyo helitaanka caafimaadka dhimirka iyo kaalmooyinka qabatinka maandooriyaha. Calgary Urban Project Society (CUPS), oo ay la socoto Alberta Health Services, ayaa sidoo kale siin doona adeegyo caafimaad iyo kuwo loogu tala aglay soo bogsashada oo isla goobta ah dadka u baahan.

“Soo gaarsiintaan Calgary ayaa ah tusaale kale oo weyn oo ku saabsan inaan adeegsanno isutagyo si aan wax uga qabanno dhibaato culus, waana tusaale kale oo ku saabsan kasoo bixista balanteenii. Xarunta Adeegsiga iyo Kaalmadu waxay wax ka qabanaysaa caafimaadka bulshada iyo tabashooyinka kajira nabadgalyada Calgary ayada oo siinaysa dhabbe toosan dadka xaaladdu ku adkaatay si ay dib cagahooda isugu taagaan. Awoodda helitaanka adeegyo fara badan oo hal meel la isugu keenay ayaa u keenaysa farqi weyn dadka reer Alberta ee nugul, ayada oo sidoo kale culayska ka yaraynaysa adeeg bixiyeyasheena iyo dadka hoyga ka shaqeeya.”

*Jason Nixon, Wasiirka Dadka Waayeelka ah iyo Adeegyada Bulshada*

Gaadiidka lagu tagayo iyo kan looga imaanayo xarunta ayaa diyaar u ah qofkii u baahan. Gaadiid dheeraad ah ayaa sidoo kale la siin doonaa dadka u baahan inay bookhdaan goobaha kale si ay taageero dheeraad ah uga helaan. Macaamiisha wata xayawaanka rabaayadda ah waxay heli doonaan taageerada xaqiijinaysa in ayaga iyo rabaayaddoodaba la daryelayo xiliga ay kaalmada raadsnaayaan.

Xarunta Helitaanka iyo adeegyada waxay ku taalaa bartamaha magaalada Calgary waxayna u dhowdahay Salvation Army Centre of Hope, ayada oo ka go'an hoyga hadda dhisan.

## **Xaqiijqooyinka kooban**

- Shaqaalahaa xaaladaha degdega ah ee gobolku maalgaliyo ee gudaha Calgary kajira waxaa kamid ah:
  - Alpha House
  - Calgary Drop-In Centre
  - Salvation Army
  - The Mustard Seed
  - YW Calgary
  - The Children's Cottage Society
  - Inn From the Cold
- Xarunta helitaanka iyo adeegyada Edmonton waxay albaabadeeda furtay Janaayo wixii intaas ka danbeeyayna:
  - in ka badan 2,280 ayaa xarunta soo gaaray;
  - qiyaastii 7,640 oo loo gudbiyay iyo kuwo si toos ah ugu xirmay adeegyada ayaa jiray;
  - ku dhawaad 545 qof oo loo gudbiyey barnaamijyada guriyaynta iyo in ka badan 560 oo kusoo xirmay adeegyada hoyga ayaa jiray;
  - qiyaastii 1,725 kaararka aqoonsiyada ayaa waxaa soo saartay Service Alberta and Red Tape Reduction;
  - in ka badan 1,330 qof ayaa la siiyay dheefo dhaqaale sida Kaalmada Dakhliga iyo AISH;
  - ku dhawaad 430 ayaa la siiyay gaadiid;
  - in ka badan 750 qof ayaa loo gudbiyey kaalmooyin caafimaad;
  - in ka badan 330 qof ayaa lagu xiray adeegyada caafimaadka dhimirka iyo qabatinka maandooriyaha, oo ay kujiraan 115 qof oo lagu xiray Barnaamijka Virtual Opioid Dependency.

## **Macluumaadka la xidhiidha**

- Isticmaalka hoyga ee Alberta

## Wararka la xiriira

- Kaalmooyin cusub oo loogu tala galay dadka nugul ee Edmonton (Janaayo. 17, 2024)
- Ka saarista meelaha la dago waxay keenaysaa horumar weyn (Febraayo. 3, 2024)
- Xarunta Helitaanka iyo Adeeggu waxay u furnaanaysaa si joogto ah (Maarso 26, 2024)
- Xarunta Helitaanka iyo Kaalmadu waxay Calgary ka furmaysaa (Juun 5, 2024)

## Su'aalaha warbaahinta

**Benji Smith**

780-686-5798

Ku xigeenka Xoghayaha Warbaahinta, Dadka Waayeelka ah, iyo Adeegyada Bulshada